QORAAL KOOBAN

# Ma yihiin mise ma ahan? Waa baaritaan ku saabsan sida ay waddanka ula qabsadeen dad ku hadla shan luqadood oo kala duwan

In ka badan afar meeloodow saddex dadka ku nool agagaarka caasimadda ee dhalashadoodu kala tahay istooniya, ruushka, ingiriiska, soomaalida iyo dadka ku hadla luqadda carabiga, waxaa ay si buuxda amaba qayb ahaan isu arkaan in ay yihiin qayb ka mid ah bulshada finishka. Waxaana baaritaankaan awgiis waraysi lala yeeshay dad tiradoodu gaarayso 1 527 qof oo ku nool caasimadda iyo agagaarkeeda.

Tiro aad u yar ayaa iyagu isu arka in ay yihiin finish. Celcelis ahaan dadka ugu yar ee iyagu isu arka in ay finish yihiin waa kuwa ku hadla luqadda istooniyaanka, kuwaasoo 10 % ay si buuxda ama u dhow isu arkaan in ay yihiin dad finish ah. Dadka ugu badan ee dareemaaya in ay finish yihiin waa kuwa ku hadla luqadda soomaaliga (43 %).

Dareenka ay u hayaan dalkii ay ka yimaadeen -marka laga hadlaayo jiilka labaad ee dadka waddanka u soo guuray- ee dhammaan dadka luqadaha kala duwan ku hadlaa, waa mid si aad ah u muuqda. Dadka ku hadla luqadda soomaaliga in ku dhow 90 % waxay iyagu isu arkaan in ay si buuxda u yihiin soomaali. Dadka ku hadla luqadaha kale in ka badan 70 % ayaa si buuxda ama ku dhow dareen ugu haya dalkii ay ka yimaadeen.

Waxaa jira qayb iyagu dareemaayaa in ay finishoobeen, islamarkaana sidoo kale dareemaaya in ay yihiin dalkii ay ka yimaadeen . Dadka ku hadla luqadda soomaaliga 43 % ayaa iyagu la mid ah dadkaas dareemaaya in ay leeyihin labada jinsiyadood. Dadka ku hadla luqadaha carabiga iyo ingiriiska afar meeloodow meel (rubuc) ayaa iyagu aaminsan labada jinsiyadood ee isbarbar socda. Istooniyaanka waa (5 % ), Ruushkana (12 %), dareenka labada jinsiyadood si aad ah ayay ugu yar tahay.

La xiriirka waddankii ay ka yimaadeen waa arin si guud uga jirta dhammaanba dadka ku hadla luqadaha kala duwan: 70 % dhammaanba dadka ku hadla luqadaha kala duwan waxaa ay si buuxda ama ku dhow

ula xiriiraan dalkii ay ka yimaadeen. Xiriirka aadka u xooggana waxaa ugu badan dadka ku hadla luqadda istooniyaanka (kaasoo gaaraya 91 %).

Tirada saaxiibbada ama dadka macrifada ee finishka ah ee ay leyihiin waa ay ku kala duwan yihiin. Dadka ku hadla luqadda ingiriiska waxaa ay dhammantood leeyihiin ugu yaraan shan qof oo dadka waddanka u dhashay oo saaxiib ay yihiin amaba ay isyaqaannaan, sidoo kalena tirada ugu badan ee dadka u kala dhashay waddamada istooniya iyo ruushka ayaa iyaguna waxaa ay leeyihiin dad badan oo saaxiibbo ah oo dhalashadoodu tahay finish. Soomaalida tiro lagu qiyaasay 45 % iyo sidoo kale dadka ku hadlaa luqadda carabiga 32 %, maba lahan wax saaxiibbo ah ama dad ay isyaqaannaan oo u dhashay dalkaan Finland.

Dadka ku hadla luqadda soomaaliga ah 70 % waxaa ay rabi lahaayeen, in ay ku noolaadaan xaafadaha ay deggan yihiin dad badan oo ah kuwa ku hadla luqaddoooda u gaarka ah. Dadka luqadaha kale ku hadlaa arrinkaan si aad ah ayuu ugu yar yahay: istooniyaanka iyo dadka ku hadla luqadda carabiga qiyaas ahaan kala bar ayaa sidaas oo kale ku fekeraaya, dadka ku hadla luqadda ingiriiskana, qiyaastii afar meeloodow meel ayaa sidaas ku fekeraaya.

Dhammaan kooxaha luqadaha kala duwan ku hadlaa waxaa ay u arkaan in dhibaato ay ka jirto dhanka caddaaladda iyo sinnaanta. Marka laga reebo dadka ku hadla luqadda carabiga, aqlabiyad aad u yar oo ka tirsan kooxaha ku hadla luqadaha kala duwan ayaa u arka, in aanay iyaga iyo dadka waddanka u dhashay u sinnayn arrimaha la xiriira sinaanta iyo caddaaladda.

Arrimaha la xiriira takooridda ka jirta suuqyada shaqada waa mid si guud u haysata dadka ku hadla luqadda soomaliga (89 %), laakiin sidoo kale waa mid caadi ka ah dhanka dadka ku hadla luqadaha ruushka (51 %), ingiriiska (40 %), iyo kuwa ku hadla luqadda carabiga (57 %) dhexdooda. Dadka ku hadla luqadda istooniyaanka (27 %) waxaa ay u arkaan in iyaga suuqyada shaqada ay kala kulmaan takoorid ka yar tan dadka kale.

Intaa waxaa dheer in qaar badan oo ka mid ah dadka luqadaha kale ku hadla ee laga tiro badan yahay ay u arkaan, in dadka finishka ah ay sawir hal dhinac oo kaliya ah ka haystaan dalalkii ay ka yimaadeen, iyo in qalabka warbaahinta ee finland ay dadka luqadaha kala duwan ku hadla ka sheegaan waxyaabo aad u xun oo aan wanaagsanayn. Soomaalida iyo carabta ayaa ah kuwa sida aadka ah qalabka warbaahinta ugu dhalleeceeynaaya arrinkaas, laakiin aqlabiyad yar oo ka mid ah dadka ku hadla luqadda ruushka ayaa iyaguna sidaa si la mid ah u arka arrinkaas.

Si kasta oo ay takoorid gaaraysa 90 % u soo waajahday dadka luqadaha kala duwan ku hadla ee baaritaankaan ka qaybqaatay, haddana si aad

u wanaagsan ama wax xoogaa ah ayay uga helayaan dalkan Finland. Waxaana arrinkaas ka helitaanka dalkan si gaar ah samayn ugu leh, hadba inta ay le'eg tahay xirfadda luqadeed ee qofku leeyahay. Dadka sida aadka u wanaagsan uga helaaya dalkaan finland, waa kuwa ay sida aadka ah u wanaagsan tahay xirfaddooda luqadeed ee finishka.

Aqlabiyadda dadka ka soo jeeda kuwa ku hadla luqadaha kala duwan, waxaa si dhab ahaan ah ama u dhow ay u doonaayaan in ay ku noolaadaan Finland illaa iyo inta cimrigoodu ka dhammaanaayo. Dadka ku hadla luqadda carabiga ah ayaa ah kuwa aragtidoodaas ay aadka u sugan tahay, kuwaasoo 60 % si dhab ahaan ah u doonaaya in ay sii joogaan dalka Finland. Dadka kale ee luqadaha kala duwan ku hadlaa, qaybta dhab ahaan ama fkirkaas qabtaa si aad ay ayay u yaryihiin. Somaalida iyo Ruushka saddex meeloodow meel ayaa doonaysa in ay sii joogaan dalkan Fainland, dadka ku hadla luqadda ingiriiska shan meeleedow meel, halka kuwa ku hadla luqadda istooniyaankana ay arrinkaas doonayaan oo kaliya toban meeleedow meel.